Waa Nuqul Dawli ah – lama iibin karo


# FAAFINTA RASMIGA AH

# EE JAMHUURIYADDA SOMALILAND

**SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE**

ألنَّشرة الرَّسمية لجمهورية صوماليلاند

| Sanadka: 1aad | Cadadka: 2aad | Taariikh: 03/03/2012 |
|---|---|---|

**QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.**

**RUKUNKA (Subscription):**

*QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii kastaba SL. Sh.*


**Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Qaranka, Madaxtooyadda JSL, HARGEYSA,**
*E-mail: **Garyaqaankaguud@gmail.com***

## TUSMADA CADADKA


| | Bogga |
|---|---|
| ***QAYBTA KOWAAD***: **XEERARKA AARLAMAANKA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:** ***Sooma bixin*** | |
| ***QAYBTA LABAAD***: **XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOOYINKA MADAXWEYNAHA:** | |
| 1) Xil-ka Qaadis; *Febarweri 09, 2012.* | 3 |
| 2) *Xeer Madaxweyne No. 0196/022012, Febarweri* 09, 2012; Magacaabid. | 4 |
| 3) Xil-ka Qaadis; *Febarweri 09, 2012.* | 5 |

| | |
|---|---|
| 4) *Xeer Madaxweyne No. 0197/022012, Febarweri* **09, 2012; Magacaabid.** | **6** |
| ***5)*** **Xil-ka Qaadis;** ***Febarweri 14, 2012.*** | **7** |
| ***6)*** **Xil-ka Qaadis;** ***Febarweri 14, 2012.*** | **8** |
| 7) *Xeer Madaxweyne No. 0199/022012, Febarweri* **18, 2012; Magacaabid.** | **9** |
| *QAYBTA SADEXAAD*: **DIGREETOOYINKA, WAREEGTOOYINKA, AMARADA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA WASIIRADA, IWM** ***Sooma bixin*** | |
| **QAYBTA AFRAAD: AMARADA IYO GO'AANADA MAAMUL** ***Guddida Diiwaangelinta Ururada Siyaasiga ah iyo Ansixinta Axsaabta Qaranka: Go'aan Guddi, Febarweri 08, 2012*** | **10** |
| *QAYBTA SHANAAD*: **OGEYSIISYADA** ***Sooma bixin*** | |
| | |

# QAYBTA LABAAD:

# XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOOYINKA MADAXWEYNAHA:

## XIL-KA QAADIS, *Febarweri 09, 2012;*

REF....JSL/M/XILQ/249/1-915/022012 09/02/12

Ku: Mudane Maxamed Xasan Cabdilaahi (Jidhif) -Hargeysa-
Taliyihii hore ee ciidanka qaranka JSL
Og: Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga -Hargeysa-

Ujeedo: **Xil Ka Qaadis**

Mudane
Waxa aan aad kuugu mahadinayaa mudadii aynu wada shaqaynaynay, xilalka Qaranka ayay dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.
Sidaa darteed waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Taliyaha Ciidanka Qaranka JSL.

Haddaba waxaan kaa rajaynayaa in aad si niyad sami ah ugu wareejiso xilka aad haysay Janaraal Ismaciil Maxamed Cismaan (Shaqale) oo aan xilka isaga u magacaabay.

Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga oo ay warqadani ogaysiin ugu socoto waxa la farayaa in uu labada masuul uu u kala wareejiyo xilka Taliyaha Ciidanka Qaranka JSL

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

## XEER MADAXWEYNE NO. 0196/022012, *Febarweri* 09, 2012;
## MAGACAABID.

REF....JSL/M/XERM/249-913/022012 09/02/12

## XEER MADAXWEYNE 0196/022012

**M a g a c a a b i d**

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu arkay : | In baahi loo qabo in la dardar geliyo hawlaha Ciidanka Qaranka; |
| Markuu Tixgeliyey: | La taashiga Madaxda ay arrintani khusayso; |
| Markuu Arkay: | In uu hanan karo xilkan loo magacaabay ; |

**Wuxuu go'aansaday;**

In Mudane, Ismaaciil Maxamed Cismaan (Shaqale) laga bilaabo taariikhda xeerkan uu ahaado Taliyaha Ciidanka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

## **XIL-KA QAADIS, *Febarweri 09, 2012;***

REF....JSL/M/XILQ/249/1-916/022012 09/02/12

Ku: Mudane, Ibraahin Caydiid Axmed
Abaandulihii Hore ee Ciidanka Qaranka JSL
Og: Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga

Ujeedo: **Xil-ka Qaadis**

Mudane,
Waxa aan aad kuugu mahadinayaa mudadii aynu wada shaqaynaynay. Xilalka Qaranka ayay dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.
Sidaa darted, maadaama aad mudda dheer soo haysay xilka Abaanduulaha Ciidanka Qaranka JSL, waxaan gartay in aan kaa qaado xilkii Abaandulaha Ciidanka Qaranka JSL.
Haddaba waxaan kaa rajaynayaa in aad si niyad sami ah ugu wareejiso xilka aad hayso Mudane, Cabdilaahi X. Jaamac Calas oo aan xilkaa isaga ah u magacaabay.
Waxaa wasiirka wasaarada Gaashaandhigga oo ay warqadani ogaysiin ugu socoto la farayaa in uu labada mas'uul u kala wareejiyo xilka Abaanduulaha Ciidanka Qaranka JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**XEER MADAXWEYNE NO. 0197/022012, *Febarweri* 09, 2012; MAGACAABID.**

REF....JSL/M/XERM/249-914/022012 09/02/12

## XEER MADAXWEYNE 0197/022012

### Magacaabid

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu arkay : In baahi loo qabo in la dardar geliyo hawlaha Ciidanka Qaranka;

Markuu Tixgeliyey: La tashiga Madaxda ay arrintani khusayso;

Markuu Arkay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu go'aansaday**

In mudane, Cabdilahi X. Jaamac Calas laga bilaabo taariikhda xeerkan uu ahaado Abaanduulaha Ciidanka Qaranka Jamhuuriyadda somliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

## <u>XIL-KA QAADIS, *Febarweri 14, 2012;*</u>

REF....JSL/M/XILQ/249/1-929/022012 14/02/12

Ku: Saleebaan Maxamed Faarax
Gudoomiyaha Hay'adda Qurbajooga -Hargeysa-

Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda JSL -Hargeysa-

Ujeedo: **<u>Xil-ka Qaadis</u>**

Mudane,
Waxa aan aad kugu mahadinayaa mudaddii aynu wada shaqaynaynay. Xilalka qaranka ayay dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cida hanan karta loo dhiibo.

Sidaa darted, maadaama aad muddo dheer soo haysay xilka Gudoomiyaha Hay'adda Qurbajooga, waxaan gartay in aan kaa qaado xilkii Gudoomiyaha Hay'adda Qurbajooga.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
<u>Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland</u>

## <u>XIL-KA QAADIS, *Febarweri 14, 2012;*</u>

REF....JSL/M/XILQ/249/1-928/022012 14/02/12

Ku: Maxamuud Raage Ibraahim
Agaasimihii Guud ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda JSL
-Hargeysa-
Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda JSL -Hargeysa-

Ujeedo: **<u>Xil-ka Qaadis</u>**

Mudane,
Maadaama oo aad xilkii ka soo bixi weyday, xilalka Qaranka ayay dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhibo.

Sidaa darteed, maadaama aad muddo soo haysay xilka Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda, waxaan gartey in aan kaa qaado xilka agaasimaha guud ee wasaarada arrimaha dibedda.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
<u>Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland</u>

**XEER MADAXWEYNE NO. 0199/022012, *Febarweri* 18, 2012; MAGACAABID.**

REF....JSL/M/XERM/249-937/022012 18/02/12

## XEER MADAXWEYNE 0199/022012

### M a g a c a a b i d

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkey: Qodobka 90aad faqradiisa (3)aad, ee xarafka (kh) ee Distoorka Qaranka,

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda Jaaliyadaha Somaliland u leeyihiin Dhismaha Qaranka,

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagadda madaxa Xafiiska xidhiidhiyaha Jaaliyaddaha Somaliland

Markuu Kafiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo,

Markuu ku qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay.

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Maxamuud Cabdiraxmaan Cali, laga bilaabo taarikhda manta uu ahaado Madaxa Xafiiska Xidhiidhiyaha Jaaliyadaha ee JSL. Xafiiskaa oo hoos imanaaya maamulka Wasaarada Arimaha Dibedda.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**<u>Jamhuuriyadda Somaliland</u>**

# <u>Xafiiska Guddiga Diiwaangelinta Ururada Siyaasadda iyo Ansixinta Axsaabta Qaranka</u>

REF : GDU/AAS/84/2012 08/02/2012

**<u>Go'aan Guddi</u>**

**Ku : Dhamaan Ururada Siyaasada JSL**

**Guddida Diiwangelinta iyadoo fududaynaysa dhiirigelinaysana inay ururadu isku biiraan.**
**Waxa ay soo saartay:-**
Inay ururadu isku biiri karaan iyagoo ku midoobi kara magacyadii u diiwangashanaa mid ka mid ah ama magac cusub oo ay ku heshiiyeen.

Wixii is bedela ee ku yimaadana dhismaha ururada waxay ku soo gudbinayaan mudo aan ka badnayn shan iyo toban cisho (15) gudohood marka is bedelku dhaco.

Guddidu waxay u baxaysaa kormeer ay ugu kuur gelayso halka ay marayso diyaar garowga hawlgalka ururadu.

Alla Mahad Leh

Xasan Axmed Ducaale (Xasan Mucalin)
Afhayeenka Guddida